Go'aan Lr: 58/2024

Date:28-4-1-2024

## Go'aan Guddi Fulineed:-

Shir ay isugu yimaadeen Guddida Fullinta Caasimadda Hargeysa maanta oo ay bishu tahay 28-4-2024), Shir Gudoomiyena uu ka ahaa Duqa Caasimadda Hargeysa **(C/Kariim Axmed Mooge)**, kuna saabsanayd **Tir Tirid File,** Dood iyo falanqayn dheer kaDib:-

## Guddida Fullintu:-

**Markay Arkeen:** Sharciga Maamulka Gobalada &Degmooyinka Jsl ee Xeer **No: 23/2019.**

**Markay Arkeen:** Tixraaca, warqada sumadeedu tahay **GGDH/MJ/02/22023.G-15/2024** ,kuna taariikhaysan **13-3-2024**, ujeedadeeduna ahayd Go, aan koobida dacwada Dacwoodaha &Dacweysanta Baloodh ku yaala Degmada ib/koodbuur, kana so baxday Guddida ka garnaqa Dacwada Gobolka M-Jeex.

**Markay Ogaadeen:** Tixraaca Warbixinta sumadeedu tahay **XDHH/XSH/0062/2024** Kuna Taariikhaysan **24-03-2024,** ujeedadeedun ahayd Talo bixin Sharci, kana soo baxday Xafiiska Shuruucda DHH.

**Markay Aqoonsadeen:** Qoraalka ka soo baxay Guddida ka garnaqa dhulka ee gobolka Maroodi-Jeex , qoraalkaa oo cadaynaaya in guddidu u xukuntay Dacwoode **Maxamed Cali obsiiye** Dhulka Cabirkiisu yahay **(18x24M)** kuna yaala degmada ib/koodbuur, lagana xukumay dacwaysan **Maryan Siciid Aadan**, maadama oo aanay lahayn dhulkaa lagana xukumay.

**Markay Tixgaliyeen:** Tallada Masuuliyiinta ay howshani khusayso.

## Waxa Ay Go'aansadeen:-

Kadib markay arkeen dhamaan asbaabaha sare ku xusan Guddida Fullintu waxa ay Go'aansadeen in loo sameeyo Tir Tirid file,ka Tr-kiisu yahay **28032,** kuna Qoran tahay **Maryan Siciid Aadan**, maadaama oo aanay lahayn dhulkaa ay u samaysatay file-ka sida ku cad qoraalka Guddida ka garnaqa Dhulka ee Gobolka M-Jeex, loona madax banaaneeyo muwaadinka Magaciisu yahay **Maxamed Cali obsiiye,** dhulkaa oo cabirkiisu yahay **(18x24m)** jihooyinkiisuna kala yihiin **Koonfur=Waddo ,Waqooyi ,Galbeed iyo bari dhisme** dhulkaa oo ku yaala **degmada ib/koodbuur**

Allaa Mahad Leh

**(Siciid Nuur Jaamac)**
**(Xoghayaha Fullinta D/Hoose/Ahna**
**Xoghayaha Golaha Deegaanka Harg.**

**(Khadar Axmed Cumar (Khadar-Nuur)**
**Ku-Xigeenka Duqa Caasimadda/Ahna**
**Gud- Xig- Golaha Deegaanka Hargeysa.**

**(C/Kariim Axmed Mooge)**
**Duqa Caasimadda Hargeysa/Ahna**
**Gud-Golaha Deegaanka CaasimaddaHarg.**

Jamhuuriyada Somaliland
Dawladda Hoose Hargeysa

Republic of Somaliland
Municipality of Hargeisa

Xafiiska Shuruucda

Ref: XDHH/XSH/0062/2024.    Date: 24/03/2024

Ku: Xigeenka Duqa Caasimada Hargeysa    =Xarunta

## Ujeedo: Talo-bixin Sharci

Mudane mayor ku xigeen anaga oo ka jawaabayna Amarka aad noo soo qortay ee ku taariikhaysan **19/ 3/2024** jeedadiisuna ahayd ka soo tala bixin sharci, Sidaas awgeed ka dib markaanu aragnay darisnay isla markaana lafa-Gurnay Go aanka ka soo baxay gudida Ka garnaqa dacwadaha dhulka ee gobalka maroodijeex ee sumadiisu tahay GGOH**/MJ/O2/ 2023/G**

Go, aankaasi oo gudidu U xukuntay dacawoode **mahamed cali obsiiye** dhulka cabirkiisu yahay **18x24M** Jihooyinkiisuna kala yihiin koonfur=wado waqooyi galbeed iyo bari dhisme iyada oo Laga xukumay dacweysan **maryan siciid aadan**

Markaanu araganay inaanu wax Racfaan ah lahayn Go, aanka ka soo baxay Gudida Dacwadaha maadaama oo lagu soo afjaray dhaar dhamaystiran si Waafqasan Qodobka 168XHM.

sidaa daraadeed waxaanu ku talabixinaynaa in Go, aan Guddi Fulineed lagu tirtiro file ka sharci ee dacweysan **maryan siciid aadan** loona dhamaystiro wixii ka dhiman Filka sharci Ee dacwoode **mahamed cali absiiye**

**Madaxa xafiiska Shuruucda**

1. Garyaqaan xuseen Axmed Caydiid) ____________
2. Garyaqaan Maxamed Cabdilaahi (Geel jire) ____________
3. Garyaqaan Axmed Maxamed faarax (Dayax)____________
4. Garyaqaan Siciid Cabdilaahi Maxamed ____________

XAFIISKA SHURUUCDA D.H.H

Go:xlen u gor goaey

Date:13/03/2024

GGDH/MJ/02/2023/G-15/2024

=Hargeisa=

Dacwoode:- Maxamed Cali Obsiiye

Wakiil:-Cali Carab Obsiiye =Hargaisa

Dacwaysane:-Maryan Siciid Aadan

**Ujeeddo: - Go'aan Koobida Dacwada Dacwoodaha & Dacweysanta Baloodh Ku Yaala Degmada Ib/koodbuur GGDH/MJ/02/2023/G-15/2024.**

**Arjiga Dacwad Furashada Ee Wakiilka Dacwoodaha:**-Wakiilka Dacwooduhu Wuxuu Guddida Usoo Gudbiyay Arjiga Dacwad Furashada Ee Ku **Tr.04/01/2023**,Ujeedadiisu Yahay Dacwad Dhul Cabirkiisu Yaha**y 24x18mt** Ku Yaala Degmada Ib/Koodbuur ,Kaas Oo U Qoran Sidan :- Aniga Oo Ah Wakiilka Dacwoodaha Magiciisu Sare Kux Usan Yahay Waxaan Halkan Ugu Soo Gudbinayaa Guddida Sharafta Mudan Dacwada Dhulka Ujeedada Ku Xusan Waana Sidan Soo Socota:-

1. Dacwooduhu Dhulka Ay Dulucda Dacwadu Ku Saabsan Tahay Waxa Iska Leh Dacwoodaha Waxaanu U Haystay Dhukumanti Dhamaystiran Iyo Maragyo'ba
2. Dacwaysantu Dhulka Waxay Ku Haysataa Sifo Sharci Daro Ah Oo Baadil Ah
3. Marka La Gaadho Marxalada Cadeymaha Waxaanu Guddida Hor Keeni Doonaa Cadeymo Buuxa Oo Ku Saabsan Dhulkaas

Sidaas Darteed Waxaanu Guddida Sharafta Mudan Ka Codsanaynaa :-

1) In Dacwaysanta Sharciga La Ii Hor Keeno
2) In L A Ogolaado Arjiga Dacwad Furashada Ee Dacwoodaha
3) In La Diido Arjiga Jawaab Celinta Ee Dacwaysanaha
4) In Dacwoodaha Dhulkiisa Loo Xukumo
5) In Kharashka Dacwada Lla Saaro Dacwaysanta.

**Jawaab Celinta Dacwaysanta:-**

Dacwaysantu Maryan Siciid Aadan Waxay Guddida Hor Timid Fadhiga Dacwada Ee Qabsoomay 21-03-2023,Waxayna Kasoo Jeedisay Jawaab Celinteeda Dacwada Oo af Ahaan Ah una dhigan sidan:-

**Soo Jeedinta Dacwaysanta:-**

Waxaan Guddida U Sheegayaa Inaan Dhulkan Iska Leeyahay 24x18m,Una Dhaw Suldaan Waxaan Ka Iibsaday Rooble Maykal Maryama **2004**,Dacwoodaha Maxamed Cali

GUDDIDA KA GARNAQA DACWADAHA DHULKA EE G. M/ JEEX — M/Jeeh Regional Committee For Land Dispute

Obsiiye Waa Odaygaygii Waxaan U Leeyahay 4 Caruur Ah In Kasta Oo Aan Kala Tagnay Awlaad Ayaa Naga Dhaxaysa ,Waxaan Tagayaa Germany Oo Ilma Xan Uunsanaya Oo Isaga Oo Uu Isagu Dhalay ,Waxaan Guddida Usoo Jeedinayaa In Dhulkaas Isaga Wax Lacag Ahi Ka Galin Sidaas La Iigu Dhaariyo iyada oo dacwaysantu sulka saarta soo jeedinteeda dhaartan.

**Qaraarka Guddida:-**Guddidu Markay Dhagaysatay Soo Jeedinta Dacwaysanta Waxay Aqbashay Soo Jeedinta Dhaarta Ee Dacwaysanta Maryan Siciid Aadan .Waxayna Guddidu Ka Ogolaatay In Dacwaysantu Ay Safarkeeda U Baxdo Waxayna Sii Wakiilatay Wakilka Magaciisu Yahay Aadan C/Laahi Xasan Sida Ku Cad Qoraalka Nootaayada Alla Magan Sumadiisu Yahay **REF:885/22** Kuna Taariikhaysan **24.08.2022.**

Fadhigaas Kadib Dacwoodaha Oo Jooga Wadanka Faransiiska Waxa Uu Soo Diray Qoraalka Guddida Ku Socda Ee Ku Taariikhaysan **17/02/2024,Ujeedadiisu Yahay Dhaar Dhamaystir Ah** Kaas Oo U Qoran Sidan :-

Aniga Oo Ah **Maxamed Cali Obsiiye** Kuna Nool Dalka **France ,Passport Number :D02587 (19Dec 2021 To 18dec 2024) Tell:0033749130244**,Waxaan Idiinku Soo Gudbinayaa Qoraal Cadeyn Dhaar Ah Maadaama Aanan Dalka Joogin ,Qof Weyna Aan Ahay Oon Hawlanahay Oo Aanan Iman Karayn Hada Waana Sidan Dhaartayadu

Aniga Oo Miyir Iyo Maanba Qaba Cid Igu Qasbaysaana Aanu Jirin Waxaan Ku Dhaaranayaa Inaan Leeyahay Baloodhkaas Ku Yaala **Degmada Ib/Koodbuur Gaar Ahaan Jig-Jiga Yare E U Dhow Waafi Mall** Cabirkiisuna Yahay **(18x24m)** Wajahadiisuna Tahay Kaliya Koonfur ,Inta Kalena Dhisme

Sidaas Darteed Waxaan Si Sharaf ,Xushmad Iyo Qadarin Leh Idiinka Codsanayaa Inaad Ii Madax Banaysaan Baloodhkaygaasi Sare Ku Faahfaahsan

Hadii La Cala Loo Baahdo Dhaartaydan Oo Maqal Iyo Muuqaal Ahna Waad Ila Soo Xidhiidhi Kartaan Oo Waan Idiin Soo Diri.

Waxa Kale Dacwooduhu Soo Gudbiyay Qoraalka 2aad Ee Ku Taariikhaysan **05/03/2024,Ujeedadiisu Yahay Dhaar Dhamaystir Ah** Una Qoran Sidan :-

Aniga Oo Ah **Maxamed Cali Obsiiye** Kuna Nool Dalka **France ,Passport Number :D02587 (19Dec 2021 To 18dec 2024) Tell:0033749130244**,Waxaan Idiinku Soo Gudbinayaa Qoraal Cadeyn Dhaar Ah Maadaama Aanan Dalka Joogin ,Qof Weyna Aan Ahay Oon Hawlanahay Oo Aanan Iman Karayn Hada Waana Sidan Dhaartayadu,Dacwaysantuna Aanay Joogin Dalka Ana Aanan Joogin Dalka Dadna Naga Wakiil Yahay

Aniga Oo Miyir Iyo Maanba Qaba Cid Igu Qasbaysaana Aanay Jirin Waxaan Ku Dhaaranayaa Inaan Leeyahay

Sidaas Darteed Waxaan Si Sharaf ,Xushmad Iyo Qadarin Leh Idiinka Codsanayaa Inaad Ii Madax Banaysaan Baloodhkaygaasi Sare Ku Faah-Faahsan

Hadii La Cala Loo Baahdo Dhaartaydan Oo Maqal Iyo Muuqaal Ahna Waad Ila Soo Xidhiidhi Kartaan Oo Waan Idiin Soo Diri.

**Asbaabta Go'aanka:-**

Guddidu Waxay Qaadatay Kuna qanacday labada qoraal ee dhaarta dhamaystirka ah ee dacwoodaha maxamed Cali Obsiiye Guddida usoo diray kuna kala taariikhaysan **05/03/2024 iyo 17/02/2024** ,dacwoodaha oo jooga France taas oo siiqada dhaarta ah ee ku qorani ay tahay sidan :-

Aniga oo ah **Maxamed Cali obsiiye** Kuna Nool Dalka **France.qof** Weyna Aan Ahay Oon Hawlanahay Oo Aanan Iman Karayn Hada Waana Sidan Dhaartayadu,Dacwaysantuna Aanay Joogin Dalka Ana Aanan Joogin Dalka Dadna Naga Wakiil Yahay miyir iyo maanba qaba cid igu qasbaysaana aanu jirin waxaan ku dhaaranayaa inaan leeyahay baloodhkaasi ku yaala degmada Ibraahim Koodbuur gaar ahaan Jig-jiga yar ee u dhow waafi Mall cabirkiisuna yahay 18x24mt,wajahadiisuna tahay kaliya koonfur inta kalena waa dhisme
Walaahi bilaahi talaahi waxaan ku dhaaranayaa in gabadhaasi aanu kala tagnay ee maryan Siciid aanay dhulkani waxba ku lahayn oo aan anigu kaligay dhulkan leeyahay.
Waxa kale oo ay Guddidu ku qanacday dhaarta ay dacwoodaha ku dhaarisay si maqal iyo muuqaal ah.

Guddidu sidoo kale waxay Ku qanacday soo jeedinta dhaarta ee dacwaysanta oo waafaqsan **Qod :- 168 XHM.**

Gudidu sidoo kale markay aragtay qoraalka dacwooduhu soo diray ee dhaarta dhamaystirka ah oo isna ay ku cadahay cadeyntiisa shakhsiyadeed ee ah **,Passport Number :D02587 (19Dec 2021 To 18dec 2024) Tell:0033749130244,**
Sidaas darteed Dhaartaas qoraalka ah ee uu soo diray dawcooduhu iyo dhaarta ay Guddidu ku dhaarisay dacwoodaha maqal iyo muuqaal waa dhaar dhamaystirka ah oo waafaqsan Qod :-168,171,172 ee XHM.Guddidu way ku qanacday waanay qaadatay dhaartaas dhamaystirka.

**Marka laga yimaado asbaabta dhaarta ee sare ku xusan waxa asbaabta Guddida sii xoojiyay :-**

1. Dacwoodaha Maxamed Cali obsiiye iyo dacwaysan Maryan siciid aadan oo ahaa qoys is qaba caruurna isu leh balse hada kala tagay.
2. Iyaga oo labadooduba ay joogaan wadanka dibadiisa.

3. Iyada oo dacwaysantu codsatay in dacwoodaha loo dhaariyo dhaar dhamaystir ah .

**Sidaas Darteed Qoraalkan Heshiiska Ah Ee Ay Dhinacyada Soo Gudbiyeen Ee Ay Guddidu Ku Qanacday Waxa Uu Waafaqsan Qod:39aad Ee Xeer-Nidamiye Lr.01/2014 Iyo 387,388XHM Waxaanu Leeyahay Xoog Fulineed Iyo Ku Dhaqan Sharci Sidaas Darteedna Guddidu Way Ku Qanacday Waanay Qaadatay.**
**Waxayna Guddidu Iyada Oo Habraacday Qodobada 68aad, 69aad,70aad, , 77aad,78aad,79aad,80aad,86aad,87aad,88aad,92aad,117aad,**
**119aad, 135aad, 192aad Iyo 193aad XHM. Isla Markaana Cuskanaysa Qodobada 2aad,3aad,4aad,9aad,12aad,14aad Ee Xeerka Maamulka Dhulka Ee Xeer No 17/2001 Oo Lala Akhariyo Xeer Nidaamiyaha Guddida Qodobadiisa:- 33,34,35,38,39,41,42,43 Iyo 723 Xm Iyo Suuratu Al Nisaa Ayadeed 58aad Iyo Qodobka 28aad Ee Xlr 17/2001.**

**Waxay Soo Saartay Go'aankan Hoos Ku Xusan:-**

**J.S.L**

**Magaca Ummadda S/Land.**

**Guddiga Ka-Garnaqa Dacwadaha Dhulka Gobolka M/Jeex.**

**LR: GGDH/MJ/2/2023/G-12/2024**

**GO'AANKII GUDIDA.**

1. **Guddidu waxay ayiday isla markaana ogolaatay qoraalka dhaarta dhamaystirka ah ee uu Guddida usoo diray dacwoode Maxamed Cali Obsiiye oo jooga dalka France ujeedadiisu yahay Dhaar dhamaystir ah kuna taariikhaysan 05/03/2024.sidoo kalena ay Guddidu ku dhaarisay dacwoodaha habka maqal iyo muuqaalka ah .dhaartaas oo ay soo jeedisay dacwaysan Maryan Siciid Aadan si waafaqsan Qod:168aad ee XHM.**
2. **Guddidu Waxay U Xukuntay Dacwoode Maxamed Cali Obsiiye dhulka cabirkiisu yahay 18x24mitir jihooyinkiisu kala yihiin Koonfur_waddo,woqooyi_Dhisme,Galbeed_Dhisme,Bari_Dhisme.kuna yaala degmada Ib/koodbuur xaafada Jig-jiga yar .**
3. **Dacwaysan Maryan Siciid Aadan waxay Guddidu ka xukuntay dhulka lagu soo dacweeyay ee cabirkiisu yahay 18x24mitir jihooyinkiisu kala yihiin Koonfur_waddo,woqooyi_Dhisme,Galbeed_Dhisme,Bari_Dhisme.kuna yaala degmada Ib/koodbuur xaafada Jig-jiga yar.**

4. Guddidu waxay baabiisay isla markaana ay tirtirtay faylka sharci ee dacwaysan maryan Siciid Aadan u samaysatay dhulkan waxaana la farayaa maamulka D/hoose ee Caasimada inay fayl sharci ugu sameeyaan dacwoodaha Maxamed Cali Obsiiye dhulkaas lagu dhaariyay ee loo xukumay.
5. Dhinacna wax kharash dacwadeed ah looma soo qaadin .
6. Wax rafcaan ah ma leh maadaama dacwadan lagu soo af jaray dhaar dhamaystir ah .
7. Go'aankani Waxaa Uu Soo Baxay Maanta Oo Ay Bishu Tahay 13/3/2024

Xubnaha Guddida Ee Go'aanka Soo Saaray

1. Maxamed Cabdiraxmaan Jaamac (Gudoomiye)________________
2. Shaafici Cabdi Haybe (Xubin)________________
3. Mursal Nuux Cismaan (Xubin)________________

Samiira Ibraahim Axmed ________________
Xubin Guddida Ahna Xoghayaha Guddida Ka Garnaqa

To: Xafiiska Sharciga

19-3-24